

Xeerka 6 Feberayo 1957, lamba. 14, rep.

Iqtisaaskeeda xilalaka arrimaha ku saabsan Madbacadda iyo Warbaahinta Raadyaha ee Loo xilsaaray Wasaaradda Arrimaha Bulshada.

MAAMULAHA

Markuu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. 1; “Dhismaha Xukuumadda Soomaaliya”;
Markuu arkay Dekereetada 18 Maajo 1956, lamba. 78 “Xeerka Nidaamka Dawladda Soomaaliya”;

Markuu arkay qod. 9 ee dekereetda 16 Nofember 1956, lamba. 108 “baabi’inta xaafiisyadi gaarka ahaa ee A. F. I. S.”;

Marka uu garowsaday habboonaanta in loo xilsaaro Wasaaradda Arrimaha Bulshada iqtisaaska wax ka qabadka arrimaha Madbacadda iyo Baahinta Raadyaha;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada;

Uuna kus ku oo taliyay Wasiirka Kowaad, uuna ku waafaqay Wasiirka Arrimaha Bulshada;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAY

Qod. 1

Wasiirka Arrimaha Bulshada – Waaxda daraasaadka – waxaa loo xilsaara wax ka qabadka arrimaha ku saabsan Madbacadda iyo Warbaahinta Raadyaha.

Qod. 2

Qod. 36 ee Dekereetada 18 Maajo 1956, lamba. 78 “Waaxda Daraasaadka” waxaa lagu kordhiyay codadka soo socda:

- “Madbacadda”
- “Warbaahinta Raadyaha”

Qod. 3

Dekereetdaan waxay dhaqangalaysaa 1 Jannaayo 1957 Muqdisho 6 Feberaayo 1957.

p. Maamulaha
P. Franca

Cabdullaahi Ciise Maxamuud

Cli Jimcaale Baraale

Lagu hubiyay lamba. 19 ee 12 Feberaayo 1957. Madaxa Xisaabaadka: **Tura**

La hubiyay lana Diiwaangashat – Diw. Lr.1, bogga 114.

Muqdisho 12 Feberaayo 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**